**Baaritaanka ilmaha cusub ee Hiddaha Caafimaadka Dadweynaha**

**Waxa laga Ogaado <u>Kadib</u> Markuu Ilmahaaga Dhasho**

Indiana Department of Health

NEWBORN SCREENING INDIANA

Ilmo kasta oo cusub oo ku dhasha Indiana wuxuu ku waajibanayaa sharciga gobolka inuu maro baaritaanka ilmaha cusub. Carruurta qabta ciladaha waxay u ekaan karaan oo ay u dhaqmi karaan sida ilmo caafimaadan laakiin waxay qabi karaan xaalad caafimaad oo keeni karto jirooyin halis ah. Daahitaanada hormarka ama xattaa dhimasho

Baaritaanka ilmaha cusub waa qeyb sadex baaris ah ee aqoonsata wax ka badan 30 cilado. Sadex baaritaano waxaa lagu sameeyaa xarunta dhalashada 24-48 saacadood dhalasha kadib. Wax badan ka ogow baaritaanada hoose oo sawiro koodhka QR wixii warbixin dheeraad ah.



## Baaritaanka Goobta Dhiiga Qalalan (DBS)

Baaritaanka goobta dhiiga qalalan (DBS) waa baaritaanka dhiiga ee dhaqsida iyo fudud ee lagu sameeyo dhinaca mudida cagta. Barta yare e dhiiga ayaa laga qaadaa dhalmada kadib iyadoo la mudayo cagta ilmaha oo la saarayo dhiiga warqada fiiltar gaar ah. Dhiigaan, waxaa loo yaqaan baraha dhiiga waxaa loo diraa sheybaarka baaritaanka ilmaha cusub meeshaas kadib laga baaro in ka badan 30 xaaladaha hidaha dhifka ah, ee nolosha halis geliso. Bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga ayaa kuu sheegi doona natiijada markii ay soo baxdo. Tan ayaa caadi ahaan ah booqashada koowaad ee fayo qabka canuga.

## Baaritaanka Cudurka Wadnaha Lagu dhaso ee Daran (CCHD)

Baaritaanka Cudurka Wadnaha Lagu dhaso ee Daran (CCHD) waa baaritaan dhaqso ah , xanuun la'aan ah, oo si tartiib ah loogu sameeyo iyadoo la adeegsanayo sheybaarka cabirka ogsijiinka si loo cabiro inta ogsajiin ee ilmaha ku leeyahay dhiigooda iyo sida uu u caafimaad qabo wadnaha iyo sanbabka ilmaha. CCHD waa eray balaaran ee loola jeedo dhowr cildaha wadnaha kala duwan; todoba noocyo kala duwan oo CCHDS ah waxaa lagu ogaan karaa sheybaarka cabirka ogsijiinka. Mid walboo ciladahaan wadnaha wuuu u baahanyahay daaweyn, oo badanaa ku lugleh qaliin, saxidooda dhalashada kadib. Haddii ilmaha u qabo CCHD oo uusan helin daaweyn waxyar kadib dhalashada, ilmaha wuxuu halis sareyso ugu jiraa inuu ku dhaco natiijooyinka caafimaadka halista ah, oo ay ku jiraan dhimasho.

## Baaritaanka Maqalka

Ilmahaaga waa in laga baaraa maqalkooda kahor inta aan laga tagin isbitaalka ama marka ay gaaraan hal sanno jir. Baaritaankaan maqalka ayaa muujinayo haddii maqalka ilmahaaga uu caadi yahay ama haddii ay u baahanyihiin baaritaan badan. Waa dhaqso, oo fudud, oo waxaa la sameyn karaa canugaagoo jiifo. Dhaqa cuslaanta maqalka ayaa daahin karto sida ilmahaaga u barto hadalka iyo isticmaalka luuqada. Gudaha Indiana, ilmaha waxay ku dhashaan dhago cuslaanta qiyaastii labo maalmood ee walba. Haddii ilmahaaga uu qabo dhago cuslaanta, waxaa jiro adeegyo iyo illo loo heli karo in lagu caawiyo ilmahaaga iyo qoyskaaga. Daraasado ayaa muujinayo in ilmaha lagu aqoonsado dhago cuslaanta ka hor inta aysan gaarin 3 bilood jir oo ay caawin helaan markuu gaaro j bilood ayaa u baran karo una isticmaali karo luuqada sida carruurta kale.

## Muhiimida Doorashada Dhaqtarka Caruurta

Doorashada dhaqtar kahor inta aan ilmahaaga dhalan waxay kaa yareyneysaa murugo badan oo waxay hubineysaa in ilmahaaga yar uu helo daryeelka ugu fiican laga soo bilaabo dhalashada. Hubi in xaruntaada dhalmada ama bixiyaha dhalmada inuu hayo magaca dhaqtarka ilmahaaga iyo warbixintooda xiriirka. Natiijooyinka baaritaanka ilmahaaga cusub waxaa lala wadaagayaa dhaqtarka ilmahaaga. Haddii ilmahaaga u baahanyahay baaritaano badan, dhaqtarka ilmahaaga ayaa kaala soo xiriirayo inuu kaala hadlo tallaabada xigta.

**Ma doonasaa xog dheeraad ah? Nagala soo xiriir!**

**NewbornScreening@health.in.gov**

Genomics & Newborn Screening Program
Indiana Department of Health
www.NBS.in.gov
phone: 888-815-0006

Early Hearing Detection & Intervention Program
Indiana Department of Health
www.Hearing.in.gov
phone: 317-232-0972

**Natiijada Shaybaadhka**

**Ilmahaaga Markaa Dhashay**

Indiana Department of Health

NEWBORN SCREENING INDIANA

Ilmahaaga ______________________________ dhashay ___________________

(magaca) (taariikhda dhalashada)

qaatay baaritaanada xiggo _____________________________________

(magaca isbitaalka/xarunta caafimaadka)

## Natiijooyinka baaritaanada goobta dhiiga qalalanee ilmahaaga:

Hadii ay wax walba Ok yihiin, natiijada waxaa loo diraa bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga. ***Waydii natiijada ilmahaaga booqashada koowaad ee ilmaha cusub!*** Hadii ay jiraan wax mushkilad ah, shaybaarka ayaa soo wacayo dhaqtarka daryeelka caafimaadka ilmahaaga. Baaritaanka waxay kuu sheegi kartaa kaliya haddii ilmahaaga **lag yaabo** inuu qabo dhibaato caafimaad; ma ogaan karno sida hubaalka ah illaa ilmahaaga uu qaato baaritaano badan. Bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga ayaa kaala hadlayo wax ku saabsan baahiyaha dhacayo marka xigta. **Eeg bug-yaraha "Baaritaanka Kadambeeya Dhalashada Ilmaha" oo wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ogolaanshaha barta dhiiga qalalan iyo keydinta"**

## Natiijooyinka baaritaanka CCHD ee ilmahaaga:

☐ **Ka Gudbay** – Ilmahaaga muusan muujin calaamado heerka hoose ee ogsijiinka dhiiga iyo oo uma badna inuu qabo CCHD laakiin waxaa lala soconayaa wixii astaamaha ah.

☐ **Kama gudbin** – Ilmahaaga wuxuu muujiyay heerarka hoose ee ogsijiinka oo waxaa laga yaabaa inuu qabo CCHD suurtogal ah. Tixraac dhaqtarka ama dhaqtarka wadnaha wixii tallaabooyinka xigga ee baaritaanka ogaanshaha oo dhinaca raajada wadnaha.

Haddii baaritaanka CCHD uu ka gudbi, ku sii soco inaad la socoto calaamadaha soo socda ee wixii mar danbe ku bilaabma ee CCHD kadib markii aad ka tagtid isbitaalka. **Haddii aad ku aragto wax ka mid ah calaamadahaan, waa markii aad wici laheyd dhaqtarkaaga.**

- Luminta midibka maqaar caafimaadan
- Buluug oo ay dabnuhu noqdaan
- Neefsi dhaqsida ah ama dhib leh
- Barar ama weynaashada wajiga, gacmaha iyo lugaha
- Korodhka miisaanka oo liita

## Natiijooyinka baaritaanka maqalka ilmahaaga:

**Taariikhda:** ____________________ **Dhagta bidix:** *Ka gudbay* *Kama gudbin* **Dhagta midig:** *Ka Gudbay* *Kama gudbin*

☐ **Ka gudbay:** Ilmahaaga waxay u badan tahay inuu leeyahay maqal caadi ah.

☐ **Ka gudbay laakiin leh arimaha qatarta:** Ilmahaaga waa inuu ka baaraa maqalka markuu gaaro 9-12 bilood da'da ah dhaqtarka carruurta maqalka oo arinta qatarta ee: ____________________________________________

☐ **Kama gudbin:** Ilmahaaga wuxuu u baahantahay baaritaanka dabagalka maqalka.

Ilmahaaga wuxuu u balansanyahay baaritaanka bukaan socodka ee ______________________________

Ilmahaaga waa inuu ka maraa baaritaanka maqalka dhaqtarka carruurta maqalka oo 3 bilood gudaheed.

**Goobta/Magaca Dhakhtarka maqalka:** ____________________________________________

**Taleefonka:** ______________________ Liiska dhaqaatiirka maqalka caruurta: www.hearing.in.gov